

Waxaa cusub corona CORONA

SOMALISKA
NAMBAR 13
JUULAAY 2020

"Gurigoo fasaxa lagu qaataa" xilligan karoona: Wanaagsanaa hilib dubashada/grilla waqtiga samarka!

**Wanaagsanaa hilib dubashada!
Laakiin waxaa jira sharciyo, si'aanu
dabku waxba u gubin. Mar mar
"waxaaba jira mamnuucid xaga dab
shidida ah" oo aan dabba la shidi
karin.**

Dad badan baa fasaxooda guryahooda iswiidhan ku qaadan doona sanadkan. In badana banaanka iyo keymahay iska aadi doonaan.

Hadaad hilbo dubaneyso, si caqli ah u dhaqan! Isticmaal meelaha khaaska ah ee maamulka degmadu sameeyey. Hadaaney jirin meelaha hilba dubashada, dooro meel dhagxaan iyo quruurux ku wareegsantahay. Iska ilaali meel caws qalalan, keymo iyo geedo ka agdhaw yihiin. Marwalbana wado biyo aad dabka ku damiso.


Markaad dhamaysato hilbo dubkaada: dami dhuxulaha dabka. Sug 10 daqiiqo, oo hubso inuu dabkii damay. Hadii lacala wax dhacaan: Wac 112. Weliga dab haka shidin buuraha dushooda ama dhagaxyada xeebaha ee jilicsan. Wey kala jabi karaan.

**Hubso marwalba in meeshu aaney ahayn
meel dab shidida ka mamnuuc ah**

Maalmaha kulul ee qalalan waxaa badan khatarta inuu dab kaco. Markaas waa mamnuuc in keynta dab lagu shito. Laakiin degmo walba

iyadaa go'aaminaysa meeshii dab shidida ka mamnuuc ah. Khatartuna si dhakhso ah bey isu bedeli kartaa. Markaa taa waa muhiim inaad marwalba oo aad hilib dubaneyso taas ogaato. Waxaa jira khariidad ku tusaysa gobolka kalmar meelaha la ogolyahay. Waxaad ka heli kartaa beyjajka internetka ee gobolka, degmada iyo kan

Om eldningsförbud




Klicka på respektive kommun i kartan ovan för information om det råder eldningsförbud eller inte.

hay'adda bad baadada.

Degmo walba iyadaa go'aansaneysa in dab la shidi karo iyo inkale. Si dhakhso ahna wuu isu bedeli karaa go'aankaas. Midabka liimiga ah/oranjaha wuxuu ka dhigan yahay mamnuuc. Cagaarkana/doogana waa ogolaan.



*Haddaad ku beegto
telefoonka kodka QR-ka,
waxa aad geli doontaa beyj
interneetka ah.*



Xataa hadii la ogolyahay waa inaad adigana fakirtaa. Is weydii, maanta ma tahay maalin ku habboon dab shidid? Si'aad wax u badan u ogaato fiirso abka MA KHATRABAA DAB SHID BANAANKA. Messhaas baad toos ugu arki kartaa, hadii dhulku ama keyntu qala lan tahay meeshaas aad doonaysa. (abku Waa luqada iswiidhishka)



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.

Kalmar kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar

Waxaa cusub corona CORONA

SOMALISKA
NAMBAR 13
JUULAAY 2020

Balkoonka wax ma ku dubanaysaa?

Ma jiro sharci kuu dii daaya inaad balkoonka wax ku dubato. Laakiin kuwa badan oo ka mid ah shirkadaha guryaha leh iyo ururada ijaareyda, ayaa leh sharciyo la raaco. Wax dubashada nooca dhuxusha laguma isticmaali karo balkoonka. Dab badan baan jecleyn qiiqa dhuxusha ee kasoo baxa dabkeeda. Isticmaal tan korontada ama gaaska loo isticmaalo. Marna haka tegin dabkoo shidan.

Dababka waaweyn ee ka dhacay Iswiidhan

Gobolkaan Kalmar wuxuu leeyahay keymo badan. Haddii dab kaco si dhakhsa ah buu u fidiyaa.

2018-kii keymo badan baa gubatay. Isla sanadkaa meelo badan oo waddanka ah baa dab ka kacay. Dad badan baa guryahoodii laga raray.

2014-kii waxaa dab weyn uu ka kacay gobolka Västmanland. Geedo milyuunaad karoon ah baa gubtay. Kumanaan dad ah baa si ikhtiyaari ah ugu gurmaday. Gobolka Kalmar shaqaalaha dab damiska iyo gawaaridooda ayaa caawimaad ugu tagay. Kumanaan dad ahna si ikhtiyaari ah bay u caawiyeen.

Ma "guri fasaxaysanaysaa"?

Weli ma maqashay ereyga "guri fasaxaysi" waa laba erey oo la isku daray "Guri" iyo fasax. Waa eray hada la sameeyey, oo macnihiisu yahay inaad guriga joogto meeshaad ka dhoofi lahayd. Markaa sanadkan dad badan qaadanaya "guri fasaxaysi".



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.

Kalmar kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar